

Juun

Qoyska qaaliga ahow,

Gu'gaan ardayda oo dhan oo dhigata fasalka koowaad ilaa fasalka lixaad waxaa loo qiimeeyey wax akhrin. Qiimeeynta waxaa lagu dhisay asaaska shakhsiga ayadoo isticmaalayo liiska wax akhrinta aan rasmiga ahayn. Ardayga wuxuu isu akhriyaa sheekada wuxuu mar kale afka uga akhriyaa macalinka. Ayadoo la raacayo akhrinta sheekada, waxay mar kale ku sheegaan ereyo ayaga gooni u ah waxayna ka jawaabayaan su'aalaha.

Waxaynu rumeysan nahay in macluumaadka uu cunugaada ka kororsado qiimeeyntaan ay tahay mid waxtar leh. Waxaynu gaarsiineynaa wax akhrinta cunugaada heer wax lagu qiyaasi karo. Wax akhrintaan cunugaada waxaa lagu tijaabiyey heer hooseeya. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ka labalabeynayaa in aan ugu yeero galaaska heerkiisu hooseeyo, maxaa yeeley horumarka seddax meelood meel caruurta ka mid ah ayaan ahayn kuwo diyaar u ah iney wax ku akhriyaaan galaaska koowaad. Intaa weliba waxaa u sii dheer, haddii cunugaada uu Ingiriis baranaayo wuxuu qaadan karaa inta u dhaxeysa seddax ilaa shan sano si uu u helo ereyada uu u baahan yahay si uu noqdo qof u akhrin kara Ingiriiska si aad u heer sareysa.

Tababar dheeraad ah ayaa la siindoonaa cunugaada laga bilaabo Seteembar, horumarka uu sameeyana si ku dhow ayaa loo hor joogi doonaa. Waqtigaasi, waxa ugu muhiimsan oo aad ku sameyn kartid guriga inta lagu jiro kuleylaha waa inaad wax la akhrisid cunugaada ama aad u akhrisid ugu yaraan 20 daqiiqo maalintii; kalana sheekeeyso waxyaabihii aad u akhrisey. Caruurta waxay wax akhrinta ku bartaan ayagoo aad iyo aad wax u akhriya. Haddii aad caawinaad uga baahan tahay waxa akhriyo ama aad qabtid wax su'aal ah, fadlan ila soo xiriir adigoo xoriyad dareemaya.

Mukhlis

Frank Johnson

Maamulaha

952-928-6600